# Duridda Kiraystaha Swansea Mews
**Su'aalo iyo Jawaabo**
**Juun 14, 2022**

---

Toronto Community Housing (TCHC) waxay ka shaqeyneysaa in aay taageerto kiraystayaasha iyadoo raaceysa amar ka yimid Sarkaalka Sare ee Dhismaha ee Magaalada Toronto si loo faaruqiyo Swansea Mews ilaa laga dhameynayo shaqada amaan looga dhigaayo meesha si aay kiraystayaasha ugu soo laabtaan.

Hooy ku meelgaar sida hoteel ama hooy-la-seexdo, ayeey kiraystayaasha u guureen, ama waxay ku jiraan habraacii guuritaanka. Talaabooyinka ku xiga waa in reeraraha laga raro meelahan ku meelgaarka ah oo la geeyo meel degan oo ku haboon oo dabooleysa baahidooda gaarka ah. Heshiis rarid oo u wareejin TCHC hantideeda gudaheeda ah, oo aay saxiixeen reeraha xaqa u leh, ayaa siin doona xaq-u-lahaansho in aay ku soo noqdaan Swansea Mews.

Waxaan garwaaqsan nahay khashkhashaadda aay arrintan keeneyso waxaana ku dadaaleynaa inaan sahalno ilaa iyo inta suurogalka ah.

Habraaca u raridda guryo degan oo muddo-dheer ah (inta dhismaha socdo) waxaa la raaci doonaa habraaca hore loo sameeyey ee TCHC ee hoos imanaya Nadaamka Raridda. Waxaa ku jira baqtiyaa-nasiib ah xulashada qoyska safka halka uu ka gelaayo, habraaca doorashada aqalka (unit), guri-u-bandhigidda iyo waxyaabo kale oo dheeraad ah.

1) **Baqtiyaanasiibka siduu u shaqeeyaa?**
   Habraaca baqtiyaa-nasiibka wuxuu ka dhacayaa Webex. Dhamaan kiraystayaasha Swansea Mews waxay ka daawan karaan tebin-toos ah. Dhamaan cinwaanada reeraha (magacyada lama isticmaali doono arrimo qofka u gaarka ah dartood) ayaa la gelinayaa fuusto loo isticmaali doono baqtiyaa-nasiibka. Cinwaanada waa laga soo bixin soo fuustada kor ayaana loo aqrin doonaa iyadoo tebinta-tooska ah laga sheegayo lambarka baqtiyaa-nasiibka.

2) **Imisa aqal ayaa la heli karaa oo raridda loogu talogalay?**

TCHC waxay muhimad ahaan Swansea ka hormarineysaa dhamaan meelaha kale ee magaalada. Marka la helo aqalo banaan, waxaan u celineynaa habraacan. Aqalo cusub ayaa maalin walbo firaaqo noqdo.

3) **Habraaca xulashada siduu u shaqeeyaa?**
Habraaca baqtiyaa-nasiibka ka dib, TCHC waxay bixin doontaa aqalada aad xaqa u leedahay. Waxaad heli doontaa waqti aad ku fiirisid liiska oo aad ku xulato aqalada aad rabto inaad u guurto. Foomka xulushada, waxaad ugu qori doontaa habka doorbideyso in aay u kala horeeyaan. Waxaan idinku dhiirigelineynaa in aad ku taxdaan aqalada ugu badan ee aad qaadan karto oo aad dooneyso in aad u guurto. Tan waxay kordhineysaa fursadahaaga in si dhaqso ah aqal laguugu soo bandhigo.

4) **Waxaan baqtiyaa-nasiibka ka helay lambar aad u sareeya. Macnaheedu ma wuxuu yahay in aan aqal la isiin doonin?**
Shaqaale TCHC ah ayaa kula shaqeyn doona ilaa aqal lagu siiyo. Lambarka baqtiyaa-nasiibka waxaa loo isticmaali doonaa cidda heli doonta aqal in loo soo bandhigo marka aay jiraan wax ka badan hal reer oo raba isku aqal.

> **Tusaale:** Kirayste A (lambarka baqtiyaa-nasiibka 35) iyo Kirayste B (lambarka baqtiyaa-nasiibka 47) labadaba waxay xusheen 123 Applewood Lane doorashadooa koowaad in uu yahay. Kiiskaan Kirayste A ayaa loo bandhigayaa in uu qaato 123 Applewood Lane. TCHC markaas ka dib waxay fiirineysaa aqalka doorashada labaad ee Kirayste B, oo aay u bandhigeysaa in uu qaato (haddii aay heystaan lambarka baqtiyaa-nasiibka ugu hooseeya, ama noqdaan kiraystaha kaliya ee doortay aqalkaas.

5) **Ka waran haddii aan dooneyn wax ka mid ah aqalda la heli karo?**
Waxaan kugu dhiirigelineynaa in aad qorto dhamaan aqalada aad tixgelineyso in aad u guurto foomkaaga xulashada. Haddii aadan dooran wax aqal ah, ama aad diido aqalka laguu soo bandhigo, waxaa lagu gelin doonaa wareega xiga ee is-qabadsiinta aqalada iyo dadka. Aqalo cusub ayaa joogto ugu soo biira aqalada dadka loo rarayo, marka waxaa dhici karta in la helo aqalo kugu haboon wareegga dambe,

inkasoo aan la ogaan karin in aay taas dhici doonto. Haddii aay jiraan aqalo reerkaaga qaadan karaan wareega koowaad, waxaan si xoogan kuugu dhiirigelineynaa in aad ku taxdo foomkaaga xulashada.

6) **Caruurteyda waxay hadda leeyihiin qolkooda jiifka. Aqalka cusub ma waxay u baahan doonaan in aay wadaagaan aqalka cusub?**
Haddii caruurtaada aay leeyihiin qolkooda jiifka Swansea Mews, waxaad xaq u yeelan doontaa in aad heysato xajmiga aqalkaaga marka lagu raro. Tusaale, haddii aad degan tahay aqal saddex qol oo jiif ah, oo aad leedahay laba gabdhood oo mid walbo heysata qolkeeda, liiska aqalada aad xaq u leedahay waxaa ku jiri doona aqalo saddex oo qol-jiif leh. Liiska aqalada aad xaq u leedahay waxaa sidoo kale ku jiri doona aqalo laba oo qol-jiif leh, maadaama mustawaha deganaashaha ogol yahay laba caruur oo ka yar 18 jir oo isku jinsiyi ah in aay wadaagaan qol-jiif. Waxaad dooran kartaa aqalo saddex qol-jiif ah iyo kuwo labo qol-jiif ah. Waxaan kugu dhiirigelineynaa in aad soo dhoweyso aqbailidda aqalo ka yar kaaga oo dabooli kara baahida qoyskaaga, maadaama taas aay ikhtiyaaradaada badineyso oo suuragal ka dhigi karto in aad dhaqso u guurto.

7) **Haddii aan aqbalo aqal ka yar in la ii raro, ma ku soo laaban karaa aqal xajmi weyn marka aan dib ugu soo guuro Swansea Mews?**
Haa, haddii aad weli xaq u leedahay aqalka ka xajmiga weyn dib waad ugu soo guuri kartaa marka aad dib ugu soo guurto Swansea Mews. Tusaalaha kore, haddii labadaada gabdhood aay weli xubin qoyskaaga ah yihiin waxaad weli xaq u leedahay aqal saddex qol oo jiif ah.

8) **Sideen ku ogaan karaa in aad ii ogolaaneysaan in aan dib ugu soo guuro Swansea Mews marka la dayactiro?**
TCHC waxay kula saxiixan doontaa heshiis rarid. Kan waa heshiis sharci ah oo idiin dhaxeeya adiga iyo TCHC wuxuuna qorayaa xaqa aad u leedahay in ku soo laabato Swansea Mews. Haddii aad jeceshahay in qareenkaaga sharciga uu fiiriyo heshiiska inta aadan saxiixin ka hor, waan kugu dhiirigelineynaa in aad saas sameyso.

**9) Kiradeyda ma kordhi doontaa?**

Haddii aad tahay Kirayste RGI (Kirada dakhliga lagu-qiyaasay) kiradaada waxaa weli lagu soo xisaabin doonaa si waafaqsan sharciyada RGI.

**10) Muddo intee la eg ayeey tahay in go'aan ka gaaro aqalka aan doorbidayo?**

Habraacan raridda si aad dhaqso u ah ayuu u dhacaayaa sababtoo ah waxaan rabnaa in aan sida ugu dhaqsiyaha badan kuugu helno aqalka in laguu raro aad dooneyso. Waxaad heli doontaa liiska aqalada aad xaq u leedahay, ka dib waxaad heysataa afar maalmood in ku xulato oo u kala horeysiiso sida aad doorbideyso.

**11) Ma booqan karaa aqalda aan daneynayo inta aanan kala horeysiinin kuwa aan doorbidayo?**

Waad booqan kartaa beelaha aqalada aad daneyneyso haddii aad jeceshahay saas laakiin nasiib darro ma ogolaan karno booqashooyin aqalka la dhexgalayo ka hor inta aadan soo gudbin waxa aad doorbideyso. Shaqaalaha Raridda TCHC ayaa la heli karaa in aay idinkaga jawaabaan su'aalihiina ku saabsan aqalada iyo beelaha aad daneyneysaan.

12) **Ma booqan karaa aqalka la ii soo bandhigo inta aanan aqbalin ka hor, gaar ahaan in aan arko gudaha aqalka?**

Haa, marka laguu soo bandhigo qaadashada aqal waxaad heli doontaa fursad aad ku booqato aqalkaas go'aan intaadan gaarin ka hor.

**13) Maxaa dhacaya haddii aanan aqbalin aqalka la ii soo bandhigo in aan qaato?**

Haddii aad diido aqal laguu soo bandhigay in aad qaadato, waxaa lagu gelin doonaa wareega ku xiga ee habraaca xulashada. Waxaa lagu siin doonaa liis kale oo aqalada aad xaq u leedahay waxaadna mari doontaa habraaca doorashada mar kale.

**14) Maxaa dhacaya haddii lacag kiro la igu leeyahay?**

Haddii lacag kugu harsan tahay oo aadan kula jirin TCHC heshiis dib-u-bixin lacageed, waxaad u baahnaan doontaa in aad heshiis loogu talogalay dib-u-bixinta lacagta la gasho. Isku-duwahaaga Adeegyada Kiraystaha ayaa kaa caawini doona habraacan.

**15) Waxaan heystaa aqal saddex qol-jiif ah, laakiin caruurteyda weey guureen haddana keligeey ayaan deganahay. Ma u guuri karaa aqal cusub oo saddex qol-jiif ah?**

Heysashada saddex qol-jiif ah ee tirada dadka kula nool waxaa la yiraahdaa qof guriga-ka-badan yahay. Haddii aad tahay qoys RGI ah oo guriga-kaa-badan yahay, liiska aqalada aad xaq u leedahay waxaa lagu saleyn doonaa xajmiga qoyskaaga ee waqtiga xaadirka ah. Kiiskan, waxaad xaq u yeelan doontaa aqal hal qol-jiif ah. Xeerka Adeegyada Guryaha wuxuu nooga baahan yahay in reeraha RGI ah xajmiga saxda ah la siiyo marka aay u guuraan aqal kale.

**16) Ma inaan bixiyaa kharashka dadka wax guuriya?**

TCHC ayaa bixin doonta kharashkaaga aad uga baxeyso gurigaaga Swansea Mews iyo sidoo kale ku soo noqoshadaada beesha marka la dayactiro ama dib loo dhiso. Laakiin, ma bixin doono kharashyada guuridda ee dib loogu soo guurinayo reerka Swansea Mews haddii aqalka uu leeyahay qolal ka fara badan tirada dadka ku nool halkaas (marka guriga-ka-badan yahay).

Wixii xog dheeraad ah ee ku saabsan habraaca raridda, fadlan taleefan kula xiriir **416-945-0900** ama email u dir Swansea.Mews@torontohousing.ca.

********